**Sharci 26 Maajo 1962, lamba. 13**

**Aasaasidda Hay'adda Gargaarka iyo Samafalka Qaranka (E.N.A.B,).**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda**

Isagoo qiray anisixintii ee Golaha Shaacabka;

**Wuxuu baahinayaa**

Sharcigan soo socda:

**Qod. 1**
**Aasaaska iyo Xarunta Dhexe ee Heyadda ENAB**

Waxaa la aasaasay Hay'adda Gargaarka iyo Faa'iidada Qaranka (E.N.A.B.), oo xarunteedu tahay Muqdisho.

E.N.A.B. waa hay'ad lagu maamulo sharciga dadweynaha, oo leh shakhsiyad sharciyeed iyo maamul madaxbannaan.

**Qod. 2**
**Ujeedada Hay'adda**

Ujeedada Hay'adda waa:

a) — in la xaqiijiyo, dhammaan gayiga Jamhuuriyadda iyo bulshooyinka Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka dibeddiisa, kaalmaynta iyo samofalka, u hiilinta danyarta; caruurta laga tagay, carmallada baahan, dumarka la furay, agoonta, dadka tabarta daran iyo qof kasta oo kale oo u baahan gargaar;
b) — kor u qaadida hindise kasta oo faa'iido u leh ujeedadan;
c) — iskudubarid hindisayaasha ilaa tan;
d) — in la sameeyo hindise ku wajahan Xukuumadda oo ah gargaarka dadweynaha iyo arrimaha samafalka.

**Qod. 3**
**Hantida**

Hantida jirku waxay ka kooban tahay maalgelin deeq ah oo ay bixisay Dawladdu si waafaqsan sharciga; iyo sidoo kale qaaraan ka yimid Dawladda, Hay'adaha dawladda, Ururada caalamiga ah, ururada gaarka ah ama shakhsiyaadka.

Iyadoo la eegayo ujeedada laga leeyahay, waa laga dhaafay cashuuraha hadda iyo kuwa soo socdaba.

**Qod. 4**
**Abaabulka Dhexe**

Xunaha Hay'adaha waa:

1) Guddoomiyaha E.N.A.B;
2) Guddiga maamulka, oo ka kooban Guddoomiyaha A.B. Iyo. sideed la-taliyeyaal;
3) Guddida Fulinta oo ka kooban saddex la-taliyeyaal, oo ay igmadeen Guddida Maamulka;
4) Guddiga Hanti-dhawrka, oo ka kooban Guddoomiyaha Guddiga, laba hanti-dhawr oo wax-ku-ool ah iyo laba hanti-dhawr oo kale oo beddelaayo. Jagooyinkaas la soo sheegay waa bilaash lacag gooni ah maleh.

## Qod. 5
## Abaabulka Heyadaha Maxalliga

Si leysugu xiro hawlaha maxaliga ah ee heyadda, Guddiga Mamulka, waxaa la dhisayaa Guddiyo heer Gobol, Degmo ama Dawlad Hoose , iyo sidoo kale Guddiyo ka socda dalka dibadiisa, kuwaas oo go'aaminaya inta ay ka koobnaan doonaan.

## Qod. 6
## Magacaabista

Guddoomiyaha Heyadda E.N.A.B. waxaa lagu magacaaayaa xeer Madaxweyne Jamhuuriyadda oo uu soo jeediyo Ra'iisul Wasaaraha, kadib markii uu dhageystay Golaha Wasiirada; La-taliyeyaasha Golaha Maamulka, waxaa lagu magacaabayaa xeer Ra'iisul Wasaaraha, ka dib marka uu la tashado Guddiga Kormeerka ee ku xusan qodobka 8; Guddoomiyaha Guddiga Hanti-dhowrka iyo Hanti-dhowrayaasha ayaa sidoo kale lagu magacaaayaa xeer ka soo baxay Wasiirka Maaliyadda.

Xafiisyada kor ku xusan waxay leeyihiin muddo saddex sano ah waana la cusboonaysiin karaa.

Guddoomiyeyaasha iyo Xubnaha Guddiyada Deegaanka waxaa magacaabaya Guddoomiyaha marka uu go'aan ka gaaro Golaha Maamulka.

## Qod.7
## Awoodda

Guddoomiyaha E.N.A.B. waxuu leedahay matalaadda sharci ah ee Hay'adda, Dawladda horteeda iyo cid kasta oo kale oo sharci ah. Wuxuu guddoomiye u yahay Golaha Maamulka. Wuxuuna magacaabayaa, shaqadana ka ceyriyaa shaqaalaha kadib marka uu sidaas soo jeediyo guddiga fulinta, isagoo la tashaday guddiga maamulka xaaladaha uu tilmaamay xeerka heyadda.

Haddii ay dhacdo maahsanaan, maqnaansho ama carqaladeyn, waxaa lagu beddelaa qofka ugu da'ada weyn  ee Golaha Deegaanka.

Guddiga Maamulka wuxuu go'aamiyaa dhammaan arrimaha la xiriiro danta guud ah, iyo arrin kasta oo uu Guddoomiyuhu uu soo gudbiyo. Wuxuu sannad kasta soo diyaariyaa miisaaniyada iyo agabka guud ee Hay'adda, isaga oo raacayo soo jeedinta Guddida Fulinta. Wuxuu go'aamiaa daryeelka dhaqaale ee shaqaalaha. Wuxuu u fasaxaa Guddida Fulinta qaraarada aan caadiga ahayn ee maamulka, iyo dhammaan qaraarada caadiga ah ee maamulka oo keenaayo kharashaad culeys maaliyadeed oo muhiim ah sida waafaqsan Xeerka Heyadda.

Guddida fulinta wuxuu fuliyaa go'aannada Golaha Maamulka. Wuxuuna awood toos ah u leedahay dhammaan qaraarrada maamulka caadiga ah oo ku tilmaaman Xeerka.

Haddii ay dhacdo arrin degdeg ah waxay qaaadi karaan tallaabooyin ku meel gaar ah oo ay awood u leeyihiin Golaha Maamulka, ayagoo u soo gudbin doono Gollaha fadhiga ugu horeeyo. Waxaana shirkooda u guddoomin doono mid ka mid ah xubnaha guddiga oo uu soo magacaabo Golaha Maamulka.

Guddiga Hantidhowrka wuxuu baaraa miisaaniyadda iyo agabka heya'adda, wuxuu hubiyaa in wax walbo si habsami u socodaan wuxuuna si cad o go'an ugu cabiraan qaab qoraal ah, kadibna wuxuu ka diyaariyaa warbixin waxayna u diraan Golaha Hantidhowrka.

Guddiyaha maxalliga ah ee Hey'adda waxay hawshooda ku qabanayaan degaanka dhexdiisa hawlaha ay u cayimeen Golaha Maamulka.

**Qod. 8**
**Guddiga Kormeerka**

Kormeerka sare ee hawlaha Hay'adda waxaa fulinaya Guddi Kormeer ah oo uu guddoomiye u yahay Ra'iisul Wasaaraha, kana kooban:

— Wasiirrada Arrimaha Gudaha, Cadaaladda iyo Garsoorka, Caafimaadka, iyo Garsoorka, Xannaana Xoolaha iyo, Maaliyadda iyo Waxbarashada Dadweynaha;
— iyo Hantidhowraha Guud;
— Labada mas'uul oo uu soo magacaabay Ra'iisul Wasaaraha.

Guddiga waxa uu ansixiyaa miisaaniyada Hay'adda, waxana laga yaabaa, sababo halis ah dartood, in ay u soo jeediyaan Golaha Wasiirada maamulka komishanka ee Hay'adda, ama kala diristiisa. Labadaas arrimoodba qodobka waxa lagu aqbalaa xeer-sharci Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ka dib marka uu dhegeysto Golaha Wasiirrada.

**Qod. 9**
**Xeerka**

Xeerka E.N.A.B. waxaa lagu ansixinaa xeer-sharci ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda; soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha, kadib markii uu dhageystay Golaha Wasiirada.

Waxka bedelka xiga ee Qodobada Ururka waxaa lagu ansixiyaa isla qaabkaas, ka dib marka la dhageysto ra'yiga Guddiga Maamulka.

**Qod. 10**
**Dhaqan Geli**

Sharcigani waxa uu dhaqan galayaa taariikhda lagu daabacay Faafinta Rasmiga ah. Sharcigan waxaa lagu dari doonaa Liiska rasmiga ah ee Sharciyada waxaana lagu daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Cid kasta oo mas'uul ka ah waxa ku waajib ah in ay ilaaliso oo ay u ilaaliso sida sharciga Jamhuuriyadda.

Muqdisho, Maarso 26, 1962.

**Aaden Cabdullaahi Cismaan**

Ra'iisul wasaaraha
**Cabdi-Rashiid Cali Shermarke**

Wasiirka Maaliyadda
**AbdulCadir Mohamed Aden**
La arkay oo diwaan gashan reg. lamba. 1 xaashi lamba. 14
Garsooraha Xisaabaadka: **Ahmed Dahir**